# Farsamada Caawinta ah iyo Iskuulada

Assistive Technology and Schools

## Maxay tahay farsamada Caawintu?

Farsamada Caawinta ah (AT) waa aalad ama adeegyo ka caawiya ardayda naafadaha ah kor u qaadida, joogtayta iyo hagaajinta awoodooda wax qabsi.

Kolka ay noqoto AT iyo ardayda naafada ah, waxaa jira nidaamyo iskuulka iyo qoysasku ay u baahan yihiin inay ogaadaan.

## Waa maxay aalada la yiraa AT?

Aalada AT waa wixii shay, qalab ama hab ah oo loo isticmaalo inay kor u qaado, joogtayso ama hagaajiso wax qabsiga ardayga naafada ah.

Tusaalooyinka aaladaha AT ah waxaa ku jira:

- Kumbuyuutaro iyo aalado khaas ah
- Aalado waxa xiriirka bila oo ay ku jiraan kumbiyuutarada yar yar
- Iswiijyo badan
- Buugaaga cajalad ku duuban iyo qaabab kale
- Qalab wax lagu maqlo
- Aalado istaag iyo talaabsi barid
- Qalab gaadiid oo gaar ah sida basas, wiishash iyo jaran-jaro



Iskuulada khasab kuma aha inay bixiyaan AT jirka la geliyo.

## Waa maxay waxa la yiraa adeegyada AT?

Adeega AT waa wixii adeeg ah ee si toos ah u caawiya helida ama isticmaalka aalada AT ga. Tuslaale ahaan:

- qiimeynta si loo ogaado AT ga ku haboon in la isticmaalo
- gadashada, kiraysiga, isticmaalka, ama hagaajinta AT ga
- tababarida ardayga, shaqaalaha, ama cidii kale ee ku lug leh barnaamijka waxbarida ardayga sida qolayaha loo shaqeeyo

## Waa goorma marka iskuulka laga rabaa inuu bixiyo aalada AT?

Gudoonada waxbarashada waa khasab inay siiyaan ardayda naafada ah Waxbarasho Lacag La'aan ah oo Quman (FAPE). Taa macnaheedu waa hadii arday naafo ahi uu u baahan yahay AT si uu u helo warbarasho quman, iskuulku kolkaa waa khasab inuu u diyaaro aalada AT ga ardaygaa.

## Sharcigee ayaa ardayda naafada ah xaq u siiya inay AT ku helaan iskuulada dowlada?

Waxaa jira 3 sharci oo waaweyn oo ardayda naafada ah xaq u siiya inay ku isticmaalaan aalada AT ga iskuulada dowlada:

(1) **Sharciga [Individuals with Disabilities Education Improvement Act (IDEA)].** Sharciga IDEA, waxa uu dhigayaa in iskuuladu siiyaan ardayda waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira. Iskuulku waa inuu siiyo AT ardayda hadii loogu baaho AT si uu adaygu ugu faa'iidaysto barnaamijyada waxbarasho. Ardayda ku jirta adeegyada waxbarashada gaarka ah waxa ay ku helaan iskuulada AT ga ugu weyn ee la heli karo.

(2) **Sharciga (Section 504 of the Rehabilitation Act).** Tani waxa ay mamnuucdaa takoorka ardayda naafada ah ee hesha waxbarashada gaarka ah iyo mida caadiga ah. AT waxaa dhici karta in laga rabo inay ku "dadaalaan gacan qabad" sida uu qabo qorshaha 504. Ku dadaalka gacan qabadku waa marka uu iskuulku ku sameeyo wax bedelaad ah dhismaha ama sharciyada si kolkaa ardayda naafada ahi ay si sinaan ah ugu helaan waxbarasho.



(3) **[Americans with Disabilities Act (ADA)].** Iskuulku waa khasab inuu siiyo gacan qabad macquul ah ardayda naafada ah uuna siiyo aalado iyo adeegyo si kolkaa ay dadka ula hadlaan. Kuwaasi waa waxyaabaha sida: turjubaano, cajalado, ama far waaweyn oo daabacan.

## Ka waran hadii uu ilmahagu naafo yahay laakiin uusan xaq u lahayn adeegyada waxbarashada gaarka ah?

Ardayga leh naafanimo noloshiisa si weyn u saameysa waxaa laga yaabaa inuu xaqu yeesho qorshaha 504 xataa hadii uusan xaq u yeelan waxbarashada gaarka ah.

Iskuuladu waa inay ku dadaalaan inay u fidiyaan gacan qabad dhamaan ardayda naafada ah kolka ay naafanimadaasi ay si weyn u saamayso nolol maalmeedkiisa. Kuwaasi waa waxyaabaha sida, is-daryeelida, gacan wax ka qabadka, socodka, araga, maqalka, hadalka, neefsiga, waxbarashada, ama shaqeynta. Qorshaha 504 waxaa ku jiri kara aaladaha iyo adeegyada AT ga.

Iskuuladu sidoo kale waa u bixiyaan AT iyadoo ah sidii gacan qabad macquul ah oo kale hadii uu ardaygu u baahan yahay si uu u helo barnaamijyada waxbarashada gaarka ah ama goob.

**Ogow:** Warqadan inteeda kale waxaa ku qorani waa akhbaar loogu tala galay ardayda xaqqa u leh adeegyada waxbarashada gaarka ah. Hadii ilmahaagu uusan xaq u lahayn adeegyada waxbarashada gaarka ah laakiin aad u malaynayso inuu xaq u leeyahay qorshaha 504, la hadal taakuleeye ama la xiriir hay'ada (MN Disability Law Center) si aad uga hesho akhbaar ama caawimaad.

## Sidee ayuu arday naafo ahi u helaa adeegyada waxbarashada gaarka ah?

Ka hor inta ardaygu uusan helin adeegyada waxbarashada gaarka ah, waxa la sameeyaa qiimeyn si loo ogaado in ardaygu xaq u leeyahay adeegyadaa iyo in kale. Qiimeyntu sidoo kale waxa ay cadeysaa baahida waxbarasho ee ardayga.

Qiimeynta waxaa sameeya koox ka socota iskuulka. Waalidka iyo ardayguna waxa ay qayb ka yihiin kooxdaa. Kooxdu waxa ay abuurtaa Qorshe Waxbarid Gaar ah [Individual Education Program (IEP)]. Ardayda ka yar 3 da sanno, IEP gooda waxaa loogu yeeraa [Individual Family Service Plan (IFSP)]. IEP waxa uu qoraa baahida gaarka ah ee ardayga, hadafyada iyo ujeedooyinka ka caawin doona ardayga inuu horukac sameeyo, gacan qabadka, adeegyada la xiriira iyo gargaarada iyo adeegyada kale ee kabida ah.

**Arday walba oo hela waxbarashada gaarka, kooxda IEP waa khasab inay tix-geliso in ardaygu u baahan yahay aaladaha iyo adeegyada AT ga iyo in kale.**



## Cidee go'aansata AT ga ardaygu u baahan yahay?

Kooxda IEP ga ayaa go'aansata AT ga ardaygu u baahan yahay. Hadii kooxdu ay qabto su'aalo ku saabsan nooca AT ga ah ee loo baahan yahay, waxa ay sameyn karaan qiimeyn kale. Qiimeynta ku saabsan AT ga waxaa la sameyn karaa xilliga la sameynayo qiimeynta hore ee adeegyada waxbarashada gaarka ah ama waxaa la sameyn karaa mar dambe hadii uu ardaygu u baahdo. Kooxda ayaa go'aansata cida qiimeynta sameynaysa. Hadii iskuulku uusan lahayn shaqaale sameyn kara, iskuulku waa inuu qortaa qof waayo- aragnimo u leh arrimahaa oo iskuul kale ama hay'ad gaar ah u shaqeeya. Wax kharash ah waa inaysan waalidka ka gelin.

## Hadii uu ardaygu iminka isticmaalo AT, ma isticmaali karaa xilliga qiimeynta?

Haa. Ardaygii iminka isticmaala AT waa uu isticmaali karaa AT xilliga qiimeynta ama imtixaamida. Tusaale ahaan, ardaygii isticmaala aaladaha lagu wada hadlo ama qalin qabsiga waa khasab inuu helaa aaladahaa xilliga imtixaanka.

## Muddo intee le'eg ayuu iskuulku haystaa inuu ku sameeyo qiimeynta?

Qiimeynta waa khasab in lagu soo sameeyo muddo 30 cisho gudaheed.

## Ka waran hadii aanan ogolaan qiimeynta iskuulku soo sameeyo?

Hadii aadan ogolayn qiimeynta uu iskuulku soo sameeyo, waxa aad cosdan kartaa qiimeyn kale oo dibada ah. Iskuuku waa inuu bixiyaa kharashka qiimeyntaa. Codsigan waa in isagoo qoran loo soo gudbiyaa kiis maamulaha ama wakiilka waxbarashada ee kooxda. Hadii iskuulku uu diido inuu sameeyo qiimeyn dibada ah, waa inay bilaabaan dacwo dhageysi si ay u cadeeyaan in qiimeyntu ay sax ahayd ayna dhameystirnayd.

## Ma la bixi karaa kharashka qiimeyn aan anigu leeyahay?

Waalidku waa ay bixin karaa kharashka qiimeyn dibada ah oo uu soo sameeyo qofka madax-banaan. Kooxda IEP waa khasab inay tix-geliso talooyinka qiimeynta dibada ah. Laakiin iskuulka khasab kuma aha inuu raaco talooyinkaas hadii aysan kooxda IEP du ogolaan aynana ku darin IEP.

## Xaggee ayaa AT ga looga qoraa IEP ga?

Dhamaan ardayda hesha waxbarashada gaarka ah, kooxda IEP gu waa inay eegto in ardaygu u baahan yahay aaladaha iyo adeegyada AT ga iyo in kale. Waxaa jira dhowr qaybood oo IEP ah oo ay dhici karto inay ku jiraan AT sida:



- Hadafyada sannadkii la higsanayo
- Dulucda muddada gaaban
- Liiska kaabayaasha gargaarada iyo adeeygada
- Liiska adeegyada la xiriira baahida ardayga

## Cidee bixisa kharashka AT?

Hadii AT loogu baahdo si ardaygu ugu faa'iidaysto waxbarashada gaarka ah, iskuulku waa khasab inuu ardayga siiyo iyadoon ardayga ama qoyskiisa aan wax kharash ah uga bixin. Iskuulku waxaa dhici karta inay ka qaado khidmad ardayga naafada ah hadii khidmadaasi tahay mid DHAMAAN ardayga oo dhan laga qaado sida khidmada isticmaalka kumbuyuutarada.

## Iskuulku ma isticmaali karaa ilo kale si uu u bixiyo kharashka AT ga?

Iskuulku waa isticmaali karaa ilo kale laakiin shuruudu waa in aysan bixin ardayga ama qoysku. Ilaha kalee ee kharashka bixin kara waxaa ku jira:

- Kaarka Caafimaadka (Medical Assistance)
- Kaar caafimaad oo arydagu gaar u ah
- Adeegyada Tababarka iyo Gacan-qabadka
- Adeegyada dowlada ee dadka indhaha la' la siiyo
- Khayraadyo gaar ah oo beeli bixiso iyo kuwa ay bixiyaan hay'adaha sama-falka

Iskuuladu waa inay waydiistaan waaldika ogolaansho si u isticmaalaan kaarka caafimaad (health insurance).

**Ogow:** Isticmaalka kaar caafimaadku waxa uu keeni karaa korhid lacagta kaarka ee bil walba la bixiyo. Waalidku waa ay diidi karaa in iskuulku uu isticmaalo kaarkooda caafimaad.

## Hadii aalada uu bixiyo Kaarka Caafimaadku (Medical Assistance) ama caymis gaar loo leeyahay kolkaa yaa iska leh aalada?

Hadii iskuulku uu soo gado aalad isagoo isticmaalaya Kaarka Caafimaadka ee Ardayga (Medical Assistance), ardayga ayaa kolkaa iska leh aaladaa. Kooxda IEP du waxa ay go'aansataa sida aalada loogu isticmaalayo iskuulka. Laakiin ardaygu waxa uu aalada u qaadan karaa guriga iskuulka ka dib iyo Sabtida iyo Axadaha, maalmaha fasaxa ah iyo marka iskuulku xiran yahay.

## Iskuulku ma diidi karaa inuu bixiyo AT lacag aan loo hayn awgeed?

Hadii kooxda IEP go'aansato in ardaygu uu u baahan yahay AT, iskuulku waa khasab inuu siiyo ardayga aalada iyo adeegyada AT ah xataa hadii xaalada dhaqaale ee iskuulku ay liidato.

## Maamulaha ama gudoonka wax barashadu ma diidi karaa go'aanka kooxda IEP da ee ah in loo baahan yahay aaladha iyo adeegyada AT da?

Maya. Kaliya uun kooxda IEP da ayaa bedeli karta IEP ga. Maamule ama gudoonka waxbarashadu ma bedeli karaan IEP ga. Iskuulku waa inuu dhaqan geliyo IEP ga xataa hadii uu diidan yahay.

## Iskuuku ma oran karaa ardaygu waa inuu fasalka dibada uga baxaa si uu u isticmaalo AT ga?

Intii suurta gal ah, ardayda hesha waxbarashada gaarka ah waa inay wax la bartaan ardayda kale ee aan naafada ahayn. Hadii AT loo isticmaali karo inuu ka caawiyo ardayga inuu wax ku barta fasalka caadiga ah, iskuulku waa inuu ku siiyaa AT fasalka caadiga ah dhexdiisa.

## Ardaygu ma qaadan karaa guriga aalad AT ah ama shaqo Sabtida iyo Axada la shaqeeyo, Faystooyinka iyo kolka iskuuku xiran yahay?

Haa, laakiin waa in lagu qoraa IEP. Waa inay jiraan sababo waxbarasho si aalada guriga loogu qaato.

## Iskuulku ma ka qaadi ama ma xadiddi karaa isticmaalka ardayga ee AT ga?



Iskuulku waa inuu u hogaansamo IEP. IEP waa inuu sheegaa meesha iyo goorta uu ardaygu isticmaali karo AT. Iskuulku ma diidi karo mana xadiddi karo isticmaalka aaladaha caawiya wax-qabsiga ardayga.

Hadii iskuulku uu aalad u qaado sida kuwa lagu socdo, wax lagu maqlo si uu uga hor taggo waxyeelo soo gaarta qof ama aalada, waa in lagu soo celiyaa ardayga sida si ugu dhaqsaha badan.

## Iskuulku ma ku khasab baa inuu siiyo aalada AT ga ardayda iskuulka laga fariisyey ama laga eryey?

Iskuulku waa khasab inay siiyaan AT ardayda naafada ah ee iskuulka laga fariisyey ama laga eryey ee ugu baahan AT ga si ay u helaan Waxbarshada Dowlada ee Lacag La'aanta ah (FAPE).

## Maxaa ku dhici hadii aalada AT ah kolka ardaygu uu ka bedesho iskuulka?

Hadii iskuulku leeyahay aalada ardayga naafada ahina uu u wareego iskuul kale, iskuulka cusub waxaa dhici karta inuu ka gato iskuulkii hore aalada. Laakiin iskuulka cusub khasab kuma aha inuu gato hadii aalada ay u isticmaali karaan arday kale.

Hadii ardaygu uu gelayo shaqo ama barnaamij waxbarasho oo ka dambeeya dugsiga sare, Waaxda Shaqooyinka iyo Horumarinta Dhaqaalaha (DEED) ayaa ka gadan karta aalada iskuulka. Ardaygu waa khasab inuu ka helayo adeegyo tababar farsamo gacanta ah hay'ada la yiraa (DEED) aaladana waa in ay la mid tahay mida ku jirta qorshaha tababarka ee ardaygu uu la gaaray hay'ada (DEED).

## Ka waran hadii aanan ku raacsanayn waxa iskuulku uu rabo inuu u sameeyo ardayga?

Hadii aadan ogolayn qorshaha IEP ga ah ee lagu taliyey ama qiimeynta ama hadii uu iskuulku diido inuu bixiyo aalada AT ga ama adeegyada, waa inaad marka hore tartiib ula falanqeysaa arrinta kooxda IEP ama shaqaalaha iskuulka. Hadii aadan wali ku raacsanayn, waa khasab inaad ku diido qoraal ahaan 14-cisho gudahood laga bilaabo maalinta uu iskuulku kuu soo diro ogaysiiska go'aanadooda. Codsan kartaa mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda:

- Qiimeyn madax-baan (eeg bogga 3)
- Shir dhex-dhexaadin ah
- Waa-waan
- Kulan kooxda IEP lala yeesho, ama
- Dacwo maxkamadeed dhageysi



Waxaad kaloo ka xareysan kartaa ashtako Waaxda Waxbarashada ee Minnesota [Minnesota Department of Education (MDE)].

## Waa maxay shirka dhex-dhexaadinta ahi?

Waxaad xaq u leedayah inaad la kulanto shaqaalaha iskuulka hadii aad diidan tahay IEP ga lagu taliyey. Iskuulku waa khasab inuu ugu yabooho shir dhex-dhexaadin ah hadii waalidku uu diido IEP ga.

Waxaad kaloo qoraal ahaan uga codsan kartaa shirka maamulaha kiiska ama wakiilka kooxda ee gudoonka. Shirka dhex-dhexaadinta ah waa in la qabtaa 10 cisho gudahood laguna qabtaa goob iyo waqti ay isku raaceen waalidka iyo iskuulkuba.

5 cisho gudahood kolka shirka ugu dambeeya ee dhex-dhexaadinta ah la qabto, iskuulku waa khasab inuu siiyo wareegto qoran waana in IEP ga la so jeediyaa uu sheegaa waxa iskuulku u damacsan yahay inuu sameeyo.

## Waa maxay dhex-dhexaadintu?

Waxa aad codsan kartaa waan-waan in lala sameeyo hay'ada Adeegyada Waan-waanta Waxbarashada Gaarka ah ee Minnesota (Minnesota Special Education Mediation Services). Arrintan wa kharash ahi uga bixi maayo waalidka. Dhex-dhexaadiye tababaran ayaa isku dayaya inuu ka caawiyo qoyska iyo iskuulka inay ka wada shaqeeyaan wixii khilaafaad ah ee dhex yaal iyo sidii ay go'aan fiican ugu gaari lahaayeen ardayga.

Adiga iyo iskuulkuna waa khasab inaad ogoshihiin dhex-dhexaadinta. La xiriir agaasimaha waxbarashada gaarka ee deegaankaaga si aad u codsato dhex-dhexaadin.

Hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan dhex-dhexaadinta, wac hay'ada la yiraa (Alternative Dispute Resolution Services coordinator ee MDE): (651) 582-8689.

## Waa maxay kulanka kooxda IEP da lala yeeshaa?

Kulanka kooxda IEP da lala yeeshaa waa kulan ay kooxda IEP du la yeelato qof dhex-dhexaad ah (dhex-dhexaad) oo isku daya inuu ka caawiyo kooxdu inay ka wada hadasho ayna qaabeyso IEP. Dhex-dhexaadiyahu ma aha go'aan gaare. Adiga ama iskuulka ayaa codsan kara in la qabto kulan IEP ah oo dhex-dhexaadiye ku jiro.

Kulanka waa in la qabtaa waqti cid walbaa ogoshahay waana in lagu qabtaa goob cid walbaa ogolaatay. Waa uu ku soo raaci karaa taakuleeye ama qof kale kulanka.

Hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan kulanka lala yeesho kooxdda IEP ga, wac xiriiriyaha hay'ada (Alternative Dispute Resolution Services coordinator ee MDE): 651-582-8689.

## Ka waran hadii kuwaasoo oo dhami ay xalin waayaan khilaafka?

Hadii kuwaa oo dhami ay xalin waayaan khilaafka, waxa aad xareysan kartaa ashtako.


- **Ashtakooyinka**

Adiga, ama cidii kale oo danaynaysaa ayaa ka xareysan karo askhtako hay'ada the MDE. Waxa aad xareysan kartaa ashtako hadii:

- Iskuulku uu ku xad-gudbo sharci gobolku ama mid dowlada dhexe leedahay.
- Uu jiro is-af-garanwaa u dhaxeeya waalidka iyo iskuulka oo ku saabsan adeegyada ardaygu helo. Taa waxaa ku jiri kara kolka iskuulku uusan u siin bixin aaladaha AT ga sida ay ugu qoran yihiin qorshaha IEP ga.

Ashtakooyinka waxaa in lagu soo xareeyaa 1 sanno gudaheed. Hay'ada MDE du waxa ay eegtaa ashtakooyinka waxa ayna go'aan uga gaartaa 60 cisho gudahood.

Waxaa ku jira complaint form (PDF) ee shabakada (website) MDE'da. Gal: http://education.mn.gov.
*(kaliya af ingiriisi)*



→ Guji *Students and Families*
→ Guji *Programs and Initiatives*
→ Guji *Special Education*
→ Guji *Conflicts in Special Education*
→ Guji *Special Education Complaints*

Ku soo hagaaji ama faaxsi ugu soo dir foomka la soo buuxiyey ciwaanka ah:

Minnesota Department of Education
Special Education Dispute Resolution Supervisor
Division of Assistance and Compliance
400 NE Stinson Blvd.
Minneapolis, MN 55413

651-582-8725 (Faaxsi)
mde.assistance-compliance@state.mn.us (email)

Waa khasab inaad koobi laga siiso ashtakadaada iskuulka ama hay'ada waxbarashada dowlada ee u adeegaysa ilmahaaga kolka aad ashatakadaada ka xareynayso hay'ada MDE.

- **Dacwad Dhageysiga**

Dacwo dhageysigu waxa uu caawiyaa xalinta khilaafaadka ku saabsan cadeynta, qiimeynta, meeleynta ama qaybaha (FAPE), oo ay ku jiraan khilaafaadka la xiriira aalada AT.

Waana fursad aad ku soo bandhigi karto daliilo aadna su'aalo imtixaan ah ku waydiin karto mas'uuliyiinta iskuulka. Waxaana qabta dacwada dhageysigeeda mas'uul madax-banaan. Mas'uulkaasi waa inuu soo saaro xukun qoran oo ku saabsan xaqaa'iqa jira. Dhageysiga dacwooyinka caynkaan ahi waa kuna sharci ah oo nidaamka sharciga la raaco kolka la qaadayo.

Khasab ma aha inaad qareen tahay, laakiin, waa fikrad fiican inaad la hadasho qareen ka hor dhageysiga dacwada.

## Xaggee ayaan ka heli karaa akhbaar kale oo dheeraad ah?

Waxa ku jirta akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada gaarka ah shabakada www.LawHelpMN.org. *(kaliya af ingiriisi)*

→ Guji *Disability*
→ Guji *Special Education*

Shabakada MDE waxay kaloo haysaa akhbaar dheeraad ah. Go to: http://education.state.mn.us. *(kaliya af ingiriisi)*

→ Guji *Students and Families*
→ Guji *Programs and Initiatives*
→ Guji *Special Education*

## Sidee ayaan ula soo xiriiri karaa Minnesota Disability Law Center?

Minnesota Disability Law Center waxa ay u fidisaa gargaar dhanka sharciga ah oo lacag la'aan ah dadka naafada ah ee Minnesota.

Si aad u codsato caawimaad, wac:
Beledyadda: (612) 334-5970
Telefoonka lacag la'aanta ah: 1-800-292-4150

Dhamaan wicitaanadda kale oo dhan: (612) 332-1441



Minnesota Disability Law Center
(Xarunta Sharciyada Dadka naafada Ah)
111 North 5th Street, Suite 100
Minneapolis, MN 55403

https://mylegalaid.org/disability-law-center/

*This publication was made possible by Grant Number 90AG0003-01-00 from the Administration for Community Living to the Minnesota STAR Program. Its contents are solely the responsibility of the authors and do not necessarily represent the official views of the Department of Health and Human Services or the Administration for Community Living.*

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan ururan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta ururan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**